Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad

Documentiga kalfadhiga 5-aad, kulankiisa: 3-aad

Kalfadhiga 5-aad **Tr: 22/10/2014**

Kulankiisa:3-aad,sacada furitan.11:15 gh, sacada xiritanka.1:30 gd.

Guntinta:140 Xildhibaan

Ajendaha:

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Codeeynta Sharciga Kalluumaysiga

4.Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Hanti-Dhawrka Guud ee Qaranka

5.Qaybinta Xisaab xirka sanadka 2013

6.Qaybinta Xeerka Isgaarsiinta Qaranka

7.Qaybinta Hindise Sharciyeedka Liisamada Ganacsiga iyo Warshadaha

8.Qaybinta Hindise Sharciyeedka Magacyada iyo Summadaha Ganacsiga

9.Qeybinta Hindise Sharciyeedka Dib-u-eegid Sharcigii jan 1989 ee lagu Dhisay Haya'dda Duulista Rayidka iyo Saadaasha Hawada

10.Qeybinta Hindise Sharciyeedka Xeerka la Dagaallanka Argagixisada

11.QeybintaDib-u-Eegid Hindise Sharciyeedka Iibka Qaranka

12.Qeybinta Heshiis ku saabsan Xuquuqda Carruurta oo uu aqbalay Golaha Guud ee Qarammada Midoobay 20kii Nofembar 1989

13.Iyo wixii kale oo howl ah.

Shir-Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Golaha Baarlamaanka F.S.

Mudane:Jeylani Nuur Iikar.

Waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Golaha Baarlamaanka F.S.

Mudane:Jeylani Nuur Iikar,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna Akhriyay,Xildhibaan:C/qaadir Sheekh Baq-daadi.

Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada uu weydistay in ay Ajendaha Ansixiyaan weyna ansixiyeen xildhibaanada..

Intaa ka dib Guddoomiyaha waxa uu ku soo dhaweeyay,Guddoomiyaha Guddiga Beeraha,Horumarinta reermiga iyo Kheyraadka Badda.

Xildhibaan:Siciid Maxamed Cali,wuxuu soo jeediyay,wuxuu golaha Baarlamaanka ka hor akhriyay sharciga kalluumeysaga,mudanayaal sharciga kalluumeysiga ayaa manta idin horyaala daqli ayuu wadanka soo galinayaa,waxaa la sameyay xilligii Rai'sal Wasaare Saacid, Waxaa Wasiir ka ahaa C/risaaq Cumar,sharci cusub maahayn ee waxey ku sameeyen Dib-u-Eegis kaliya,sharcigan wuxu ahaa Xeer L.23 oo lagu dhaqmi jiray, hada wasaarada, waxaa la yirahda wasaarada Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda , hada waxaa wasiir ka ah Maxamuud Col-ow Barow, sharcigaan waxa uu na soo gaarey Tr:5/6/2013, sharcigan wuxuu ka kooban yahay(9 qeybood, 44Qodob, 25peg) sharcigan guddiga wax badanbay ka badalen waxna way ku daren, Guddiga wuxuu u soo gudbiyay Guddoonka Tr:22/10/2013,waxaa Baarlamaanka la hor kanayTr:29/12/2013.

Mudanayal Tr:22/10/2014 Waxaa hortiina yaala sharciga kalluumeysiga oo aad ogtihin in uu aad muhiim uyahay hadii la ansixiyo uu fai'do badan uu leeyahay wadankana uu soo galinayo daqli badan,wuxuu xadidaya kalluunka sharcidarada loga kalluumeysanayo baddena, dhalinyarada oo shaqo loo abuurayo,iyo

burcadbadeeda oo hoos udhaceysa,mudanayaal waxaan idinka codsanayna in aad u codeysan sharcigan.

Intaa ka dib Guddoomiye ku xigeenka 1aad, wuxuu sheegey, sharcigaan waxaa naloo soo gudbiyay kalfadhigii 4aad,wasaaradii hore ayaa soo gudbisay.

Xildhibaan:Samaan,wuxuu soo jeediyay,waxaa haboon in xildhibaanada la siiyo waqti ay ku soo akhristaan, waayo mudo badan ayaa ka soo wareegatay si ay u xusuustan.

Guddoomiye ku xigeenka 1aad,wuxuu soo jeediyay,xildhibaanada 48sac, ka hor ayaa loo qeybiyay lana war galiyay in lo codeynayo sharcigan kalluumeysiga.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu xildhibaanada u sheegay,Hindise Sharciyeedkan in badan ayuu na horyaala waxaa naloo soo gudbiyay kalfadhigii 4aad, guddiga in put koda waa ka soo dhamaatey, Hindise Sharciyeed kasto marka lo codeynayo anagoo dhowreyno Xeer Hoosadka waa in koorom ka fadhiya golaha dib loogu noqda lana soo tiriya.

Intaa ka dib Guddoomiye ku xi geenka 1aad,wuxuu soo jeediyay,furitaanka kulanka wuxuu ku furmay 140 xildhibaan, hada tirada fadhisa waa 108 xildhibaan Codeyn ma gali karno, waxan sii wadaneynaa Hanti dhawrka inta ay ka soo galayan xildhibaanada.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa ku soo dhaweyay Hanti Dhawrka Guud

Guddoomiyaha Hanti –Dhawrka Guud ee Qaranka, Dr:Nuur Jimcaale Faarax: Wuxuu golaha Baarlamaanka ka hor Akhriyay Hindise sharciyeedka hanti dhowrka uu si guud u dulmarey,Guddoonka iyo mudanayaalka iga guddooma salaan,manta oo ay Tr:22/10/2014,waxaan halkan usoo istaagaey in aan wax yar ka iraahdo sharciga waxaa lagu dhisay xeerka hanti dhawrka Guud ee Qaranka J.F.S. wuxuuna bedelayaa xeerka tirsigiisu yahay Lr.34 ee 14 Abriil 1972wax badan ayuu soo jiray ilaa inta aan qaranka ahayn,waxaan lahayn sharci hati dhowr wuu isbadelay waayo wadanka marxalado kala duwan ayuu soo marey anagoo la jaan qaadeyno nidaamka maamul wanaaga iyo maaliyada aduunka u dhigan anagana qeyb ayaan ka nahay shuruucdas lagu sameeyay mexcico waa la badalay,waxaa

logu badalay Liili bayru1977 waxa loo madax banayey hanti dhawrka,sharcigan wuxuu brabosal uu marey sanadkii 1972, sharciga hadii uu madax bananayn sharci ma noqonkaro.

Hanti dhawrka inta uu u wareegin nidaamka Baarlamaanka, anaga waxaan hoos tagi jirnay Madaxweynaha sanadkii 1974,mudanayaal Baarlamaanka waxaan la wadaagayaa in sharcigan adinka inaad leedihiin,sharci Baarlamaanka la shaqeynayo in uu noqdosharciga hantida ma guurtada iyo tan guurtada ah ilaalinteeda ayan leenahay, sanad walba waxaad igu leedihiin in aan idiin siiyo xog sanadla ah sida uu qabo qawaniinta aduunka, xogta meesha aan ka siin lahaa Madaxweynaha ama Rai'sal Wasaaraha inaan adinka idiinla wadaago arintaasna waa arin guul ah taasna waa tan keentay in uu bedelo Hindise sharciyeedki hore, anaga waxaan shaqeynaynaa mudo 9bilood ah waxaan soo ururinay dhamaan hantidii guurtada ah iyo midi maguurtada ah inta noo hartay sanadkan inta ka hartay ayaan soo ururinaynaa dhamaan hantida qaranka.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari

Waxa uu soo jeediyay,sharcigaan manta waa in aan meel dhigno 48sac ka hor ayaa la idiin sheegey in loo codeynayo sharcigaan.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi Fadhayo,wuxuu soo jeediyay,su'al guddoomiye xeer Lr.34 ee 14 Abriil 1972,hanti dhawrka qaranka uu dalku lahaa in aad noo keento ayan u baahanahay,wadanka sharci ayuu lahaa si aan dulmar ugu sameyno waa in aan helnaa sharcigii hore sida loo qeybiyay kan, waa in isagana loo qeybiya, waxaa kale oo aan soo jeedinaya, 3dii maalmod ee balanta aheyd,maxaa ka qaldamey,maxaa ka saxmay, wixii ka qaldamay wan u baahanahay adinkana guddoonkii ayaa tihiin anagana balanta ayaan leenahay.

Xildhibaan:C/risaaq Cusmaan Jurile,wuxuu sheegey,waan u mahad celinayaa hanti dhawraha in dhowr qodob cadeymo iga siiso, Qodob.2aad, F.5aad,hay'ada-ha Dastuuriga,aniga macalin baan soo ahaa ardeyga ma isticmaali karo miyaa khadka cagaaran shacabkana ma isticmalayo miyaa khadka ma waxaa kaliya oo isticmalayo xafiiska hantidhawrka oo kaliya waa in la cadeeyaa, Guddoomiyaha maxkamada sare waa Dastuuri,Wasiirka wasaarada maaliyadda waa

Dastuuri,Madaxweynaha waa Dastuuri,waa in si cad loo qeexa yaase la siinayaa khadka,Qodob.8aad,yaa go'aaminaya, aaway wasiirka maaliyadda cidina waa in ay soo jeedisa,cidina waa in ay go'aamisaa, go'aankii la soo gaaro ma Baarlamaanka waa cide,waa in cid un ay faah-faahisaa yaa go'aaminayo.

Xildhibaan:Ibraahim Cali Cumar,wuxuu soo jeediyay,Qodob.2aad xafiiska waxa uu baarayaa hantida dowlada (financial Audi),laakiin barista Teknolojiyadda(IT Audit), ma qaabka shaqada ayay ula jeedan, mase teknolojiyadda ayay ula jeedan waa in fasiraad laga bixiyaa barista Teknolojiyadda IT.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka,Mudane:Muxamed Sheekh,wuxuu sheegey,xildhibaan fadhaya wuxuu codsadey sharciga xeer Lr.34, waa yaala, haloo qeybiyo xildhibaanada, arinta labaad guddiga joogtada ayaa soo go'aaminayo maalinta isqiimeynta golaha halkaas ah ayaan go'aanku soo gaarnay shuruucda sidey u soo galeyso.

Guddoomiyaha Hanti Dhawraha, Dr:Nuur Jimcaale Faarax,mar hadii hanti dhawr laga hadlayo waxaa la dhawrayaa waa hanti, maaliyadda waxaa is kabaya xisaabiyihii guud oo leh ilaalinta miisaaniyada,waxaa is kabaya dhaq-dhaqaaqa iyo anigoo korjogteynteda leh ama baaris ku sameynayno xisaabiyihii guud ma saxbaa mase waa qalad, ma lamariyay habdhaqankii, hanti dhawraha guud iyo xisaabiyaha guud waxaan kala leenahay labo oo kala ah khad iyo qalin cagaaran, hadii miisaaniyada aad ku aragto khad cagaaran waxaa iska leh hanti dhawraha hadii miisaaniyada aad ku aragto qalin gaduudan xisaabiyaha ayaa komanti ka yimid, marka laga hadlayo guddiyada Dastuuriga sababta looga guuray sharcigii hore ee Lr.34, waa in aan la jaan qaadno qawaaninta aduunka,waxaan riboorsinaya Baarlamaanka kaabayaasha dhaqaale marka laga hadlayo waa guddoonka iyo guddi la yiraahdo (Bag), habka aniga leygu ansixiyay waa gacan tag sidaas oo kale sharcigaan isagana waxa lagu ansixiyay gacantaag, cida go'anka iska leh oo Degrato ku soo saaray waa Madaxweynaha,(IT Audit) waxaan tababar siin donaa ciidanka booliska.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka,Mudane:Muxamed Sheekh,wuxuu soo jeediyay, in hanti dhowraha jawaabihiisa ay koobnadan,ilaa hada magacaga waa hanti dhawraha guud ee qaranka, hantida dowlada ay leedahay waxaa ka mid ah

hanti ma guurta ah iyo hanti guurta ah, hantidaasi si sahal loo wareejiyo ama si barayfad ah yaa ka masu'l ah hantidaas,waxaa la doonayaa hantida ma guurtada aniga ogaalkeygii dhamaanwaxey ka diiwan gashnayeen wasaarada maaliyadda, iyadaa masu'l ka aheyd guri kasto oo hanti qaran ah kan laftigiisa oo baarlamaanka waa in uu ka diiwaan gashnadaa, maalinta laga wareejinayo wasaarada maaliyadda, waa in lagu wareejiyaa Degreto Golaha wasiirada, soo jeedinta waxaa is kaleh wasiirka, go'aan qaadashada waxaa iska leh golaha wasiirada, meel marinta waxaa iska leh Madaxweynaha,Barabosalka, Baramashin ka wali waa taaganyahay ilaa ay xukuumada ay keento wax la badelayo ma jirto,dhamaan guddiyada madaxa banan iyo xafiisyada madaxa banan labadaba waa ogolyahay Dastuurka.

Xildhibaan:Khaliif Xaaji Maxamed,wuxuu soo jeediyay,Baarlamaanka xaq ayuu uleeyahay in ay ogaadaan hanti dhawraha howshiisa iyo waxa uu qabto umada waxaa ragaadiyay musuq-maasuq, meelo badan oo awood fiican uu ku leeyahay ayaa jirta, hadii sanadkii kalfadhiga hal mar la keno warbixinta hanti dhowrka waa arin lagu farxi karo guulna soo hoyatay.

Xildhibaan**:C/laahi Abshirow,**wuxuu sheegey,Qodob.2aad,F.7aad,maxaad astaanti ugu dhigi weysay warqad cad oo xabageysan beeqaaminta waa maxay.

Xildhibaan:Maxamed Nuur Xagaafe,wuxuu soo jeediyay,Hindise sharciyeedka uu soo gudbiyay hanti dhawruhu, wuxuu ku leyahay saxiix majiro, ilaa iyo hada xad gudub habsami u socodka miisaaniyada cida kuxadgudubtay warbixin managa siin kartaa.

Guddoomiyaha Hanti Dhawrka Guud, wadanka sharci ayuu leeyahay canshuurta waxaa laga keenaa wasaarada maaliyada ma jirto wax ku xadgudub ah, waxaa ku jira kuwo laga qaaday waqtigii talyaaniga iyo ingiriiska waa buugaag waaweyn oo lagu dhaqmayay wadanka intuu soo jiray habkaan dabagalka umareyno,wey ku qoran yihiin,waxaan qeyb ka nahay ururo caalami waa inan la socona qalinka cagaaran aduunka oo dhan baa laga isticmaala, anaga waa in aan raadino hantida dalka iyo miisaaniyada,waa run dadkan somaaliyeed in badan aya musuq-masuq ragaadiyay soomaaliya waxaa lagu tilmamaa meelaha uu kubadan yahay,sharciga 1972 waa la qeybinayaa waa yaala.

Xildhibaan:C/laahi Jaamac,wuxuu sheegey, mida hantida maguurtada kama maqlin jawaabteda Dastuurka kuma cada in uu madax bananyahay iyo wax difacaya hanti dhawrka, Qodob.110,wuxuu tilmamayaa guddiga ladagaalanka musuq-maasuqa side baad u wada shaqeyneysan baahi badan baa loo qabaa, waa in la xoojiyo hanti dhowrka iyo musuq-maasuqa oo u ku milmin fulinta.

Xildhibaan: Xaaji Cabdi Yare,wuxuu soo jeediyay,waa in la arkaa sharcigii 1972dii oo nalagu qanciya wax ka madax bananan karo hay'adaha qaranka majiro.

Xildhibaan:Bashiir Jaamac,wuxuu sheegey,waxaan codsi u soo jeedinayaa in labadii hishiis naloo keeno, hay'adaha Dastuuriga waxey ku fiicantahay in ay cadahay sanadkii waa in hal mar la kena Baarlamanka warbixinta hanti dhowraha guud.

Guddoomiyaha Hanti dhowrka Guud eeQaranka,tan C/laahi Jamac,Qodobka.114 ee Dastuurka xafiisyada madaxa banana wey jiraan waxaa ka mid ah,Hanti dhoawrka guud,Bankiga dhexe,xafiiska xeer ilaaliyaha guud,xafiiska madaxa banan waxaa loo sameyay in laga fogeeyo laanta fulinta,sharcigan madax banaanidiisa meesha ayay ku qorantahay,ninka adiga ku magacaabey ayaa kaa qaadi kara,qaabka aniga leyga qaadi karo wey qorantahay,guddiga maaliyada iyo Baarlamaanka ayaa arintaas iska leh.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Mudane:Muxamed sheekh cusmaan,wuxuu soo jeediyay,xidhibaanada harsan dooda waxaan ka dhiganeynaa sabtida hadii alla idmo, hanti dhowrka qaranka codeyntii la rabey wey is dhintay sabtida Ajendaha ugu horeya ayaan ka dhiganeynaa waxey noqoneysaa codeyn waan dhameynayna,waxaan u gudbinayaa guddiga maaliyada si ay ugu tala qaatan ra'yiga ay xildhibaanada soo jeediyeen,howl wadeenada hadal qoraalka ino haya In minidkaas la ii keno maalinta sabtida.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu soo jeediyay,Xildhibaano waxaa la idiin qeybiyay dhowr shuruuc 48sac waa in aad ku soo akhrisataan Xeer Hoosaadka ayaa na faraya maadama ay badan tahay shaqada wixii shuruuc ah soo gudbiya.

Guddiga joogtada bari 5sac inay shiraan aya laga doonayaa si Ajendaha hortabinta u soo maareyan ayaan ka rajeynayaa, waxaa shaley naga baaqatey

laba gobol warbixintoda anaga ma baaqanin xildhibaanada ayaa maqnaa,waxaan doonayaa in lagu soo daro warbixinada kale oo gobolada ay xildhibaanada hayan

Waxaan u mahad celinayaa xildhibaan xagaafe warbixintii wanaagsaneyd ee u ka soo gudbiyay gobolka nugaal, talooyinka aad bixineysan in ay ahaato mid gobolada iyo degmooyinka isku si ay u taabaneyso.

Xildhibaan:Fowsiya Xaaji Aadan,waxaa maalin dhaweyd ila soo xiriiray hay'ad caalami ah oo warbaahin ah oo xaalada la socota waxey I weydiiyen in ciidamada siiralyon oo la yiri waa imaanayaan,hadana hubaal ah in ay imaanayan,siiralyon marii dagaalka ka dhacay waxaa u gurmaday Ingiriiska, hada markii cudurka laga helay waxaa u soo gurmatay isla wadanka Ingiriiska, anaga itaal daradeena waad ogtihiin in cidina noo soo gurmaneyn,waxaa loo bahanyahay qeylo dhaan hadii ay yimaadan waad garan kartaa xaalada meesha ay mareyso intaas ayaan doonayay in aan idin ogeysiyo, waa in guddi loo saaro.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Mudane:Muxamed Sheekh,wuxuu soo jeediya y anigana an idiinku kordhiyo wixii macluumad isbadelka lagu sameynayo ciidamada siiralyon, waxaa warqad ama cosi iiga yimid anigoo ku simo Madaxweyne ah waxaan uyeeray wasiirada ay markaas quseysay iyo taliyayaasha ciidamada iyo ku xigeenadooda ayaan isugu yeeray go'aan waxaan ku gaarnay in ciidamadaas siiralyon ayna noo imaan xataa kormeer in ayna noogu imaan, kuwan meeshan joogo lacala hadii ay nayiraahdan sarkaal ayaa imaanayo aan dhahno maya noma imaankaro, waxaa jirta in aan dhisnay guddi uu madax u yahay Wasiirka Wasaarada Caafimaadka Dr:Duflle xubin nooga yahay anaga, waxaa kale oo aan raaciyay Airport, dadka ka soo dagaayo in la wareysto meelaha ay soo maren hay'adaha nala jooga bal in ay caafimaad marin karaan.

Waxaan si toos ah ula hadlay safiirka inoo joga Adis ababa Tr:15/10/2014ka, 16ka shir ayaa ka dhacayay Adis ababa(AU),safiirka waxaan ka codsaday in uu ogaado warqadii ofishalka ahayd aan u diray in ay gaartay, wuxuu igu yiri way soo gaartay warqada,safiirka waa ka hadlay shirka arintina ciidamada waa soo jeediyay in ciidamada siiralyon ay noo imaan Karin, hadii ay doonayaan ciidamada halkan jooga wey la bixi karaan, hadii ay la baxaan waxaan go'aan ku gaarnay, in

aaga ay ku jiren in la geeyo AMISON iyo Ciidamada Qalabka sida ee soomaaliyeed, alla noo barya in uu dhinac naga mariyo cudurkan.

Shir Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Baarlamaan F.Soomaaliya, uu shir Guddoominayay kalfadhiga 5-aad kulankiisa:3-aad uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:30 gd.